

Qorshaha Ka Qeybgalinta Bulshada (Community Engagement Plan)

Cutubka

2

Hagaha xubinta bulshada

UJEEEDADA HAGAHAN

Hagahan wuxuu bixinayaa guudmar ku saabsan hawlaha gaadiidka ee gobolka oo waxa uu qeexayaa sida Washington State Department of Transportation (WSDOT) u qabato shaqadeeda. Waxaa lagu saleeyay aragtida isticmaalaha si looga caawiyo dadka Washington inay fahmaan sida loo adeegsado nidaamka iyo waxay ka filan karaan WSDOT:

- Maxaa dhaca marxalad kasta oo ah habraaca go'aan qaadashada gaadiidka?
- Sidee loo gaaraa go'annada iyo sidee ayaan uga qaybqaadan karaa si aan saamayn ugu yeesho go'aamadaas?
- Waa maxay fursadaha ka qaybgalka marxalad kasta? Waa maxay noocyadah jawaab celin la raadiyo?

Waxaa muhiim ah in maskaxda lagu hayo in hal cabir uusan ku haboonayn dhamaan. Iyadoo qaybtani ay si guud u qeexayso nooca shaqada WSDOT ay ku qabato heerarka kala duwan ee bixinta adeegyada gaadiidka, kooxaha WSDOT waxay habeeayaan habraacyadooda hawlo kala duwan oo ku salaysan nooca shaqada, adkaanshaha, iyo bulshooyinka ay saamaysay.

Falanqaynta macluumaadka dadka waxay ina siinaysaa fikrad ah sida loo habeeyo hawlaha si loo daboolo baahiyaha bulshooyinka, laakiin taasi waa qayb kamid ah sheekada. Bulshooyinka waxay u baahan yihiin inay u sheegaan WSDOT waxa loo baahan yahay. Tusaale ahaan, hadii loo baahan yahay qoraalo qaab kale ah ama luuqad kale ah, ama hadii loo baahdo qalab gaar ah oo ku haboon dadka naafada ah wakhtiga kulanka dadweynaha.

BIXINTA ADEEGYADA GAADIIDKA: FAHAMKA HABRAACA

Waxda Gaadiidka Gobolka Washington waxay bixisaa qorshayaasha gaadiidka, mashaariicda iyo adeegyada waafaqsan sharciyada, qawaaniinta, xeerarka iyo waxyaabaha laga filayo ee ay dejiyaan dawladda dhexe iyo mida gobolka. Siyaasadaha gaadiidka waxaa lagu dajiyay qorshooyin mudo fog aj oo ay soo diyaariyeen Gudiga Gaadiidka Gobolka Washington (Washington State Transportation Commission, WSTC) iyo WSDOT.

Waxaan ku maaraynaa nidaamkayaga anagoo shaqaynayna, joogtaynayna, ilaalinayna nidaamyada gaadiidka ee jira. Waxaan sidoo kale ka shaqaynaa si aan u ogaano baahiyaha, u qiimayno xeeladaha, u kala saarno xalalka oo aan ugu talagalno kheyraadka. Habraacani wuxuu diirada saarayaa wax ka qabashada ujeedooyinka wax qabadka, wuxuu hubinayaa u hogaansanaanta shuruudaha dawladda dhexe iyo gobolka, wuxuuna hubinayaa inaan nahay wakiilo wanaagsan oo maalgashi dadweyne.

Marxalad kasta ee habraacan kamid ah waxay leedahay fursado kala duwan oo dadweynuhu ka qeyqaataan. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan talaabo kasta waxaa lagu bixiyay bogaga soo socda, oo ay kamid yihiin:

- Waa maxay talaabooyinka dhacaya oo go'aamo nooc ee ah ayaa lagu gaara heerarka habraaca?
- Waa maxay aaladaha/hawlaha sida caadiga ah loo isticmaalay?
- Waa maxay doorka aan ku leeyahay masraxan?

NIDAAMKA GAADIIDKA IYO HABRAACA GANACSI EE BIXINTA ADEEGA

Dejinta qaab-dhismeedka siyaasada

Jihaynta siyaasada waxaa kamid ah sharci-dejin, jihaynta ka timaada guddoomiyaha gobolka, xeerarka dawlada dhexe iyo sharciyada, iyo qorshayaasha fog ee uu soo saaray gobolka. Dadweynuhu waxay ka qeybqaadan karaan sharci-dejinta iyada oo loo marayo xubnaha sharci-dejinta, guddoomiyaha gobolka iyada oo loo marayo xafiska guddoomiyaha, iyo sharciyada dawlada dhexe iyo xeerarka iyada oo loo marayo wakiilada Xildhibaanada. Qorshayaasha gaadiidka ee siyaasada gaadiidka tooska ah ee Washington waxaa kamid ah Qorshaha Gaadiidka Washington (Washington Transportation Plan) iyo Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee Badqabka Wadada ee Gobolka Washington (Washington State Strategic Highway Safety Plan): Hiigsiga Ku Dhimasho La'aanta iyo Dhaawacmi La'aanta Shilalka Wadooyinka (Target Zero).

Waa maxay talaabooyinka dhacaya oo go'aamo nooc ee ah ayaa lagu gaara heerarka habraaca?

Qorshayaasha gobolka oo dhan waxay dajiyaan aragtida gaadiidka iyo hadafyada gobolka, waxay tilmaamayaan baahiyaha mustaqbalka ee nidaamka gaadiidka, waxayna qeexayaan jihada istaraatiijiga ah ee lagama maarmaanka u ah si loo gaaro hadafyada.

Waa maxay aaladaha/hawlaha sida caadiga ah loo isticmaalay?

- Kulamada dadwaynaha ee shakhsi ahaanta ah iyo kuwa khadka fogaan araga ah.
- Bogaga websaytka.
- Bandhiyada furan ee khadka onlaynka ah.
- Waraaqaha xayaysiiska.
- Iimaylo.
- War saxaafadeedyo.
- Wargeesyo.
- Kulanada ururka qorshaynta magaalooyinka (Metropolitan planning Organization, MPO)/ururka qorshaynta gaadiidka gobolka (Regional Transportation Planning Organizations, RTPO).
- Aqoon iswaydaarsiyo.
- Koox la-talin.
- Baraha Bulshada..
- La-talinta qabaa'ilka dhaladka ah.

Waa maxay doorka aan ku leeyahay masraxan?

Fikrada bulshada ee heerkana ayaa muhiim u ah in laga caawiyo qaabaynta aragtida, dajinta hadafyada iyo qeexitaanka jihada istaraatiijiga ah. Doorarka ka qaybgalka waxaa kamid ah ka qaybgalka xog-aruurinada, ka qaybgalka kulamada dadweynaha, ka qaybgalka kooxaha la-talinta ama gudiyada hogaaminta, ama bixinta faalooyin ku saabsan ama ku saabsan dhukumiintiyada qabyada ah.

Tusaalooyin yar oo ah qorshayaasha gaadiidka gobolka oo dhan ee laga soo saaray gobolka Washington:

Qorshaha Gaadiidka Washington (Washington Transportation Plan)	https://wstc.wa.gov/wtp/washington-transportation-plan/ https://wsdot.wa.gov/construction-planning/statewide-plans/washington-transportation-plan
Qorshaha Nidaamka Duulimaadyada Washington (Washington Aviation System Plan)	https://wsdot.wa.gov/travel/aviation/aviation-plans-studies/aviation-planning/washington-aviation-system-plan-wasp
Qorshaha Doomaha Masaafada Dheer ee Gobolka Washington (Washington State Ferries Long Range Plan)	https://wsdot.wa.gov/travel/washington-state-ferries/about-us/washington-state-ferries-planning/washington-state-ferries-long-range-plan
Qorshaha Nidaamka Wadooyinka (Highway System Plan)	https://wsdot.wa.gov/construction-planning/statewide-plans/highway-system-plan

Qorshaha Istiraatiiji ahaaneed ee Badqabka Wadada (Strategic Highway Safety Plan): Target Zero	https://wsdot.wa.gov/construction-planning/statewide-plans/strategic-highway-safety-plan-target-zero
Qorshaha Gaadiidka Dadweynaha ee Gobolka Washington (Washington State Public Transportation Plan)	https://wsdot.wa.gov/construction-planning/statewide-plans/public-transportation-plans
Qorshaha Nidaamka Xamuulka ee Gobolka Washington (Washington State Freight System Plan)	https://wsdot.wa.gov/construction-planning/statewide-plans/freight-rail-plans/freight-system-plan
Qorshaha Isu-gudubka Xamuulka (Freight Mobility Plan)	https://wsdot.wa.gov/construction-planning/statewide-plans/freight-plans

Maaraynta hantida nidaamka

Maaraynta hantida waxaa ugu horayn loola jeedaa hawl-galinta, dayactirka, iyo ilaalinta hababka gaadiidka iyo adeegyada ay ku jiraan wadooyinka, buundooyinka, doomaha, iyo adeegyada kale.

Waa maxay talaabooyinka dhacaya oo go'aamo nooc ee ah ayaa lagu gaara heerarka habraaca?

Ka qaybgalka heerkana waxaa loo qaabeeyey si ka duwan sababtoo ah wakhtigan hantida gaadiidka ayaa horay u jirtay waxaana ognahay inaan u baahanahay inaan joogtayno, ilaalino oo aan ku shaqeyno. WSDOT waxay ku dadaashaa inay bixiso macluumaadka, hesho jawaab celin, oo ay sii wado wada hadal joogto ah oo lala yeesho bulshada ay u adeegto.

Waa maxay aaladaha/hawlaha sida caadiga ah loo isticmaalay?

- Kulana dawladeed ama hay'adaha dawladeed.
- Waraaqaha xayaysiiska/Suugaan/Wargeesyo.
- Telefishinka/ Raadiyaha.
- Jawaabaha iimaylada iyo wicitaanada telefoonka.
- War saxaafadeedyo.
- Boosto ugu diraan.
- Ku bandhiga shaashadaha safarada.
- Bandhig furan (khadka onlaynka ama shakhsi ahaaneed).
- Kulamada bulshada (dhagaystayaasha ay aqoonsadeen hogaamiyayaasha bulshada).
- Kulana Gobolka iyo/ama Kulamada Ururka Qorshaynta Magaalada (RTPO/MPO).
- Ku wargalin (qof aan aqaano, saaxiib, qoys, iwm.).
- Wada sheekaysi fool ka fool ah/ Albaabka ku garaacida.
- Bogaga websaytka iyo Baraha Bulshada.
- Boorarka lagu dhajiyo goobaha nasashada.
- Kulamo fool ka fool ah ee goob ka dhaca.
- Calaamadaha fariinta la qaadan karo ee la badali karo.
- Bixinta macluumaadka marka la adaayo iyo inta la joogo dugsiyada.
- Isbadalada qorshaha adeeg.
- Nidaamka balansashada baabuurta.
- La-talinta qabaa'ilka dhaladka ah.

TUSAALOYINKA

- Xaaladaha la xiriiir maaraynta hantida, waxaad isticmaali kartaa barnaamijka abka ee lagu soo dejisan karo moobilka ee WSDOT, eeg kamaradaha onlaynka, eeg calaamadaha wakhtiga safarka, ama nagu raac baraha bulshada. Lifaayada baraha bulshada ayaa laga heli karaa qeybta hoose ee boga kore ee websaytka WSDOT ee wsdot.wa.gov.
- Habraaca La Xisaabtanka Dayactirka (Maintenance Accountability Process, MAP) waa aalad lagu cabiro oo gudbiya natiijada hawlaha dayactirka. Waxay bixisaa aaladaha ku xira qorshaynta istiraatiijiyadeed, miisaaniyada iyo bixinta adeega dayactirka. Sanadkii hal mar, kormeerada goobta waxaa lagu sameeyaa qaybo si aan kala sooc lahayn loo soo doortay ee wadooyinka weyn. Natiijooyinka shaqada WSDOT waa la cabiraa, la duubaa oo la barbardhigay shuruudaha MAP si loo go'aamiyo heerka adeega (Level of Service, LOS) ee la bixiyo. Waxaad ka heli kartaa aalada websaytkayaga ciwaanka soo socda: <https://wsdot.wa.gov/about/accountability/maintenance-accountability-process>.
- Ka hel wax badan oo ku saabsan wax qabadka wakaaladayada iyo horumarka iyo sidoo kale sida aan u cabirno goobta la xisaabtanka WSDOT: <https://wsdot.wa.gov/about/accountability>.
- Kusoo wargali ciladaha dayactirka wadada weyn.
- Dayactirka Wadada Wayn ee WSDOT waxay kormeeraan baahiyaha maalin laha ah ee ilaalinta nidaamka wadada wayn ee gobolkeena. Shaqadeenu waa in aan ku ilaalino kaabeyaasha wadooyinka si habsami leh, ilaalinta dadka, iyo alaabada shaqayna 24 saac maalintii, 365 maalmood sanadkii.
- Foomka jawaab celinta ee khadka onlaynka ah: <https://wsdot.wa.gov/about/contacts/send-us-your-feedback>.

Waa maxay doorka aan ku leeyahay masraxan?

Sida kor ku xusan, hawlaha heerkana ayaa ugu horayntii la xiriira hawlaha, dayactirka iyo ilaalinta nidaamka gaadiidka. Ka qaybqaadashada heerkana waxay inta badan ka kooban tahay ka warhaynta dadka iyo bixinta talooyinka saamaynta hawlaha la filayo.

Aqoonsiga baahiyaha iyo qiimaynta xeelado kale

Marxaladan, WSDOT waxay la shaqaysaa iskaashiga maxalliga ah, daneeyayaasha, iyo bulshooyinka si ay u qiimeeyaan wax qabadka nidaamka gaadiidka, ay ogaadaan baahiyaha dheeraadka ah, iyo mudnaanta siiyaan baahiyaha. Kadibna xeeladaha wax looga qabanayo baahiyaha la aqoonsaday ayaa la baaraa.

Waa maxay talaabooyinka dhaca oo waa maxay go'aamada ayaa lagu gaaray heerkana habraaca?

Inta WSDOT ay u aqoonsato baahiyaha isku-xidhka gaadiidka oo ay qiimeeyso xeeladaha wax looga qabanayo baahiyaha, fursadaha ka qaybgalku waxay ka jiraan gobolka iyo dawladaha hoose labadaba. Xafisyada qorshaynta gobolka WSDOT waa meel fiican oo laga bilaabi karo, ama waxaad ka qaybgeli kartaa shirarka maxalliga ah sida kuwa ay qabtaan ururada qorshaynta magaalooyinka (Metropolitan planning Organizations, MPOs), ururada qorshaynta gaadiidka gobolka (Regional Transportation Planning Organizations, RTPOs), ururada qorshaynta qabiilka, iyo dawladaha hoose. WSDOT waxay la xiriirta kooxaha kale ee danaynaya halka ku haboon ama hadii la codsado. Tusaalooyinka kooxaha WSDOT laga yaabaa inay la xiriirto inay ku jiraan kooxaha bulshada, ururada mulkiilayaasha guryaha, bixiyayaasha gaadiidka, kooxaha waaweyn, kooxaha baaskiilka iyo lugeeyayaasha, kooxaha deegaanka, ururada ganacsiga, rugaha ganacsiga, degmooyinka dugsiyada, ururada xaafadaha iyo kuwa kale. Macluumaadka xiriirka MPO-yada, RTPO-yada iyo WSDOT waxaa laga heli karaa barta <https://wsdot.wa.gov/engineering-standards/planning-guidance/tribal-regional-planning>.

Waa maxay aaladaha/hawlaha sida caadiga ah loo isticmaalay?

- Daneeyayaasha iyo gudiyada fulinta.
- Bandhigyo shakhsi ahaan, khadka onlaunka ama kuwa isku-dhafaan.
- Bandhigida kooxaha deegaanka (dhagaystayaasha y aqoonsadeen hogaamiyayaasha bulshada).
- Xog-aruurinada lagu sameeyay baraha bulshada (Facebook, Twitter, SurveyMonkey).
- Kulamo dadweyne oo leh nasasho u dhaxaysa kulanada.
- Bogaga websaytka.
- Waraaqaha xayaysiiska.
- Iimaylo.
- War saxaafadeedyo.
- Wargeesyo.
- RTPOs/MPOs.
- Aqoon iswaydaarsiyo.
- La-talinta qabaa'ilka dhaladka ah.

Waa maxay doorka aan ku leeyahay masraxan?

Heerarkan, fursadaha ka qaybgalku waa in la bixiyo tallo ku saabsan baahiyaha nidaamka gaadiidka iyo yoolalka la xidhiidha, soo jeedinta talooyinka, soo gudbinta walaacyada, la socoshada, iyo bixinta fikrada xeeladaha fikradeed.

Kala saaritaanka xalalka iyo u qoondaynta kheyraadka

Waa maxay talaabooyinka dhacaya oo go'aamo nooc ee ah ayaa lagu gaara heerarka habraaca?

Inta WSDOT ay ka shaqaynayso si ay u kala saarto xalalka una qoondayso kheyraadka, waxaa muhiim ah in la fahmo talaabooyinkii hore ee la qaaday. Marxaladahan, baahida qorshe, mashruuc ama adeeg ayaa la dajiyay, waxaana la baaray xeelado kale oo lagu daboolayo baahida. Ka qaybgalku waxa uu diiradda saari karaa qeybaha naqshadaynta ee xalka iyo ka helitaanka "qiimaha lacagta" ee ugu badan ee kheyraadka la heli karo.

Waa maxay aaladaha/hawlaha sida caadiga ah loo isticmaalay?

- Kooxo diirad saaraya.
- Bogaga websaytka.
- Baraha Bulshada..
- Bandhig furan (khadka onlaynka, shakhsi ahaaneed ama isku jira).
- Kulanada kooxaha danaynaya.
- Bandhigida kooxaha deegaanka (dhagaystayaasha ay aqoonsadeen hogaamiyayaasha bulshada).
- Xog aruurino.
- Waraaqaha xayaysiiska.
- Iimayl.
- War saxaafadeedyo/wargeesyo.
- Boosto ugu diraan.
- Wargeesyo.
- Bandhigyada/aalada tiknoolajiyada ee xayaysiiska/carwooyinka.
- Kulamada bulshada ee jira.
- La-talinta qabaa'ilka dhaladka ah.

Tusaale; Ka qaybgalka bulshada iyo hababka wadatashiga qabaa'ilka ee barnaamijka horumarinta gaadiidka gobolka oo dhan (Statewide Transportation Improvement Program)

Barnaamijka Hormarinta Gaadiidka Gobolka oo dhan waa koox mudnaan leh, mashruuc gaadiid noocyo badan leh oo socon doona muddo afar sano ah, oo leh miisaaniyad kooban. Statewide Transportation Improvement Program (STIP) waa loo baahan yahay waxaana ansixiya dawlada dhexe.

Mashruucyada waxaa loo kala mudnaan siiyay iyadoo la adeegsanayo hababka qorshaynta iyo qorshaynta Qabaa'ilka, dhaldka ah ee deegaanka, gobolka, iyo maamulka gobolka, waxayna matalaan siyaabaha lagu ilaalinayo laguna wanaajinayo isku xirka gaadiidka gobolka.

Mashruucyada la ansixiyay oo kaliya ee ku qoran STIP waxa u oggolaan kara Maamulka Jidadka Dawlada dhexe iyo Maamulka Gaadiidka Dawlada dhexe inay isticmaalaan lacagaha dawlada dhexe.

Hay'adaha Deegaanka waxaa looga baahan yahay inay sameeyaan oo ay qaataan barnaamijyada gaadiidka ee lixda sano ah, oo leh ugu yaraan hal dhegeysi dadweyne inta lagu jiro horumarkooda. Hay'adaha deegaanka ah waxay ka shaqeeyaan qorshahooda magaalo-madaxda ama ururrada qorshaynta gaadiidka gobolka iyo hogaaminta wakaalada degmada, sida ku haboon, si loogu daro mashaariicda labadaba barnaamijyada horumarinta gaadiidka deegaanka iyo gobolka. Haddii hay'ad ay u soo gudbinayso mashaariicda Transportation Improvement Program (TIPs) si loo xusho, waa inay qabataa ka qaybgalka dadweynaha. (FIIRO GAAR AH: Xafiiska Gudoomiyaha Gobolka iyo sharci-dejinta gobolka waxay raadiyaan ka qaybgalka dadweynaha inta lagu jiro dhammaan wejiyada horumarinta iyo ansixinta miisaaniyadda labadii sanaba mar).

Qabaa'ilka Dhaladka ah ayuu uga baahan yahay sharciga dawlada dhexe si ay u horumariyaan qorshayaasha gaadiidka ee mudo fog. Waa inay sidoo kale horumariyaan barnaamijyada horumarinta gaadiidka Qabaa'ilka (Tribal Transportation Improvement Program) oo ay ku jiraan dhamaan mashaariicda la maalgaliyo barnaamijka gaadiidka Qabaa'ilka ee loo dejiyay dhismaha 3 ilaa 5 sano ee soo socota. Transportation Improvement Programs (TTIPs) waxaa sidoo kale oo kamid noqon kara kuwa kale ee dawlada dhexe, gobolka, degmada iyo mashaariicda gaadiidka degmada.

Xafiiska Arimaha Hindida, Federal Highway Administration (FHWA), ama Qabaa'ilka Dhaladka ah waa inay ka qaybgaliyaan dadweynaha marka la samaynayo qorshaha mudo fog. Qabaa'ilka Dhaladka ah waxa looga baahan yahay in uu sameeyo ka qaybgalka dadweynaha ee TTIP iyaga oo ku daabacaya ogeysiis wargeysyada maxaliga ah ama qabaa'ilka marka qabyo qoraalka TTIP la dhameeyo. Maqnaanshaha wargeysyada dadweynaha ee maxaliga ah, Bureau of Indian Affairs (BIA) ama qaranka Qabaa'ilku waxa ay soo dhejin karaan ogaysiisyada hoos yimaada dhaqamada maxaliga ah ee la aqbali karo.

Kadib marka ay ansixiyaan Qabaa'ilka dhaladka ah, TTIP-yada waxaa loo gudbiyaa BIA ama FHWA. Nuqul ay FHWA ay ansixisay TTIP ayaa lagu soo celiyaa qaranka Qabiilka iyo BIA (FHWA waxay ururisaa TTIP-yada la ansixiyay hal dhukumiinti sanadkii). Mashruucyada qabaa'ilka waxaa la soo galiyay websaytka STIP: <https://wsdot.wa.gov/business-wsdot/support-local-programs/delivering-your-project/statewide-transportation-improvement-program-stip>.

Goobaha magaalada, Ururada qorshaynta magaaloyinka waxay horumariyaan qorshayaasha gaadiidka magaalooyinka ee dawlada dhexe looga baahan yahay iyo barnaamijyada horumarinta gaadiidka magaalooyinka. Metropolitan Transportation Plan (MTP) waa qorshe gaadiid 20 sano ah oo loogu talagalay wadooyinka waaweyn ee gobolka, wadooyinka degmada, wadooyinka magaalada iyo wadooyinka qabaa'ilka ee ku dhexyaala xadka goobta qorshaynta MPO.

MTP-yada waxaa looga baahan yahay in la cusboonaysiiyo ugu yaraan afartii sanaba mar tayada hawada meelaha aan la helin iyo dayactirka iyo ugu yaraan shantii sanaba mar goobaha kale. Ka qaybgalka bulshada ayaa loo baahan yahay sida ku cad nidaamka ka qaybgalka dadweynaha ee MPO. MTP-yada waxaa ansixiya MPO kadibna loo gudbiyaa gudoomiyaha, Maamulka Wadooyinka Dawlada Dhexe iyo Maamulka Gaadiidka Dawlada Dhexe, ujeeddooyin macluumaad.

Metropolitan Transportation Improvement Program (MTIP) waa liistada mudnaan leh oo afar sano ah oo mashaariicda gaadiidka ah oo waafaqsan MTP. Kahor inta aan mashruuca lagu darin MTIP, bulshada waxaa la siiyaa fursad ay dib ugu eegis ku sameeyaan ugana faaloodaan, sida lagu qeexay nidaamka ka qaybgalka dadweynaha ee ururka qorsheynta magaalooyinka. MTIP waxaa ku jira dhamaan mashaariicda muhiimka ah ee dawlada dhexe maalgaliso iyo gobolka oo ay soo gudbiyaan qabaa'ilka dhaladka, magaalooyinka, gobolada, gobolka iyo bixiyeyaasha gaadiidka. Liistada mashruuca ee MTIP-yada waxaa ansixiyay MPO iyo Xog-hayaha Gaadiidka. (FIIRO GAAR AH: MPO-yada waxaa laga yaabaa, laakiin loogama baahna, inay soo

gudbiyaan wargalinada bilaha ah ee MTIP-kooda ee u dhanaanshaha STIP. Kuwaas waxaa loo yaqaanaa wax ka badalka TIP.)

Ururka Qorshaynta Gaadiidka Gobolka waa urur ay maalgaliso dawlada gobalka, ururka iskaa wax u qabso ee dawlada hoose ee degmada ama gobolada isku xiran oo xubno ka ah magaalooyinka, degmooyinka, WSDOT, Qabaa'ilada Dhaladka ah, dekedaha, adeega bixiyayaasha gaadiidka, loo shaqeeyayaasha gaarka ah iyo kuwa kale ee ku jira xudduuddeeda urur. RTPO-yada waxaa ogolaaday Sharciga Maaraynta Kobaca ee gobolka Washington ee 1990 si loo hubiyo isku-duwitaanka deegaanka iyo gobolka ee qorshaynta gaadiidka iyo in la horumariyo qorshayaasha gaadiidka gobolka ee lagu dabaqi karo iyo barnaamijyada horumarinta gaadiidka gobolka ee lixda sano ah. RTPO-yadu waxay dabooli karaan magaalooyinka iyo miyiga labadaba.

Iyada oo ku salaysan habraacyada lagu heshiiyey, hogaanka wakaaladaha degmada, magaalooyinka miyiga, qabaa'ilka dhaladka, bixiyayaasha gaadiidka iyo gobolku waxay si toos ah ugu soo gudbin karaan mashaariicda dawlada dhexe iyo kuwa gobolka muhiimka ah WSDOT si loogu daro STIP ama RTPO-yada. Kahor inta aan mashruuc lagu darin liistada RTIP, bulshada waxaa la siiyaa fursad ay dib ugu eegaan oo ay uga faaloodaan liistada mashruuca, sida ku cad nidaamka ka qaybgalka dadweynaha ee Regional Transportation Improvement Program (RTPO).

WSDOT waxay hubisaa in Regional Transportation Program (RTP) iyo RTIP ay waafaqsan yihiin sharciga gobolka, iyo hadii ay sidaas yihiin, WSDOT waxay ku daraysaa afarta sano ee ugu horreeya RTIP ee STIP iyada oo aan isbadalin. (FIIRO GAAR AH: RTPO-yada waxaa laga yaabaa, laakiin loogama baahna, inay soo gudbiyaan cusboonaysiinta bishiiba mashruucda RTIP si loogu daro STIP.)

Ka qeybgalinta bulshada waxaa dhiirigaliyay WSDOT iyadoo loo adeegsanayo nidaamka STIP: <https://wsdot.wa.gov/business-wsdot/support-local-programs/delivering-your-project/statewide-transportation-improvement-program-stip>.

Waa maxay doorka aan ku leeyahay masraxan?

Ka qaybgalinta waxaa kamid ah:

- Bixinta macluumaadka taageeraya dib u eegista farsamada.
- Bixinta fikrada qorshooyinka qabyada ah.
- Ka war haynta.

Fursadaha waxaa kamid noqon kara:

- Ka qaybqaadashada kooxaha deegaanka.
- Ka qaybqaadashada daneeyayaasha ama kulamada bulshada.
- Xaadiritaanka bandhigyada furan.

Booqo websaytka WSDOT ama baraha bulshada si aad ula socoto oo aad u bixiso jawaab celin. Xarunta dhexe ee WSDOT ama xafiisyada gobolka ayaa kaa caawin kara inaad ka qaybqaadato. Macluumaadka xiriirka waxaa laga heli karaa barta <https://wsdot.wa.gov/about/contacts/offices-regions>.

Hormarinta xalalka la maalgaliyay

Waa maxay talaabooyinka dhacaya oo go'aamo nooc ee ah ayaa lagu gaara heerarka habraaca?

Halkaa marka la joogo habraac adeeg bixinta, waxa mar hore la dejiyay baahi, waxa la tixgaliyay xeelado kale, waxa la ogaaday xal, iyo kheyraad loo qoondeeyay. Ka qaybgalka wakhtigan inta badan waxaa ka mid ah barashada waxa laga filayo marka mashruucu aado dhismaha ama saameyn ku yeesho go'aamada ku saabsan qaybaha naqshadaynta ee xalka.

Waa maxay aaladaha/hawlaha sida caadiga ah loo isticmaalay?

- Kooxo diirad saaraya.
- Bogaga websaytko.
- Baraha Bulshada.
- Bandhig shakhsi ahaan, khadka onlaunka ama kuwa isku-dhafaan.
- Kulamada golaha deegaanka.
- Kulanka kooxda daneeyayaasha.
- Bandhigida bulshada deegaanka (dhagaystayaasha ay aqoonsadeen hogaamiyayaasha bulshada).
- Warqad xayaysiis ah.
- Iimayl.
- War saxaafadeed.
- Wargeesyo.
- Boosto u diraan.
- Ku bandhiga shaashadaha safarka.
- Kulamada dadweyne iyo aqoon iswaydaarsi.
- La-talinta qabaa'ilka dhaladka ah.

Waa maxay doorka aan ku leeyahay masraxan?

Heerkan, WSDOT waxay la hawlgelisaa iskaashatada iyo xubnaha bulshada si ay u bixiyaan macluumaadka ku saabsan waxa laga filayo marka mashruucu aado dhismaha iyo in la helo fikradda naqshadeynta la soo jeediyay. Furaha guusha heerkan waa cadaayn ku saabsan marxalada habraaca aan ku jirno. Halkaa marka aan gaarnno, waxa aanu hore u eegnay wax ka badalka, hagaajinta xalka, iyo kheyraadka loo qoondeeyay.

Ka qaybgalka marxaladan waxaa badanaa lagu qabtaa Gobolada WSDOT (<https://wsdot.wa.gov/about/contacts/offices-regions>). Waxaad sidoo kale oo aad la xiriiri kartaa Adeegyada Horumarinta ee WSDOT (<https://wsdot.wa.gov/business-wsdot/highway-access-requests-training/development-services>).

Fulinta xalalka

Waa maxay talaabooyinka dhacaya oo go'aamo nooc ee ah ayaa lagu gaara heerarka habraaca?

Marka xalku gaaro marxaladan, ka qeybgalinta waa inay dhacdaa qaab qaabaysa siyaasada gaadiidka, la aqoonsado baahiyaha, la qiimeeyo xeelado kale, la kala saaro xalka, loo qoondeeyo kheyraadka, lana sameeyo xal la maalgeliyo. Ka qaybgalinta marxaladaha hore waxay ahayd inay heerkano u keento guul.

Maadaama uu xalku mar hore soo maray dhamaan talaabooyinka horumarineed, marxaladani waxay ugu horayn ku saabsan tahay hirgalinta istiraatiijiyadda ka soo baxday habraaca hore iyo ka qaybgalka. Inta badan ka qaybgalinta marxaladan waxay ka kooban tahay wadaagista macluumaadka ku saabsan saamaynta ka imanaysa hirgalinta xalka.

Waa maxay aaladaha/hawlaha sida caadiga ah loo isticmaalay?

- Daabacaada, sheekooyinka raadiyaha iyo telefishinka.
- Bogaga websaytka.
- Baraha Bulshada.
- Boosto ugu diraan.
- Warqadaha xayaysiiska ah.
- Is-dhexgalka qof qofka ah/wada sheekaysiga fool ka foolka ah.
- Waraaqaha xayaysiiska.
- Ku daritaanka wargeesyada.
- Shaashada xayaysiiska.
- Carwooyin.
- Bandhigyo khadka onlaynka, shakhsi ahaan ama kuwa isku-dhafan.
- Kulanada bulshada deegaanka (dhagaystayaasha ay aqoonsadeen hogaamiyayaasha bulshada).
- Kulanada ururka qorshaynta magaalooyinka (Metropolitan planning Organization, MPO)/ururka qorshaynta gaadiidka gobolka (Regional Transportation Planning Organizations, RTPO).
- Aqoon iswaydaarsiyo.
- La-talinta qabaa'ilka dhaladka ah.

Waa maxay doorka aan ku leeyahay masraxan?

Fikrad ahaan, ka qaybalinta marxaladan waxay ka kooban tahay in la helo macluumaadka kahor iyo marka ay shaqadu sii socoto. Si loo gaaro natiijo dhismee oo guul leh, is-dhexgalka ayaa la filayaa waana muhiim. Mashruucyada adag iyo kuwa xiliyada badan, la-talinta iyo iskaashiga ayaa lagama maarmaan u ah in la qanciyo ama la yareeyo baahiyaha iyo baahida bulshada ee aan la saadaalinin.

Macluumaadka gaarka ah ee mashruuca waxaa laga heli karaa websaytka WSDOT.

- Mashruucyada marka degmo ahaan loo kala qeybiyo: www.wsdot.wa.gov/.
- Raadinta mashruuca: <https://wsdot.wa.gov/construction-planning/search-projects>.
- Raadinta daraasada: <https://wsdot.wa.gov/construction-planning/search-studies>.

- Mashruucyada deegaanka: <https://wsdot.wa.gov/business-wsdot/support-local-programs/find-local-project>. Door-to-door interactions/one-on-one conversations.
- Waraaqaha xayaysiiska.
- Ku daritaanka wargeesyada.
- Shaashada xayaysiiska.
- Carwooyin.
- Bandhigyo khadka onlaynka, shakhsi ahaan ama kuwa isku-dhafan.
- Kulanada bulshada deegaanka (dhagaystayaasha ay aqoonsadeen hogaamiyayaasha bulshada).
- Kulanada ururka qorshaynta magaalooyinka (Metropolitan planning Organization, MPO)/ururka qorshaynta gaadiidka gobolka (Regional Transportation Planning Organizations, RTPO).
- Aqoon iswaydaarsiyo.
- La-talinta qabaa'ilka dhaladka ah.